



Oregon

Kate Brown, Governor

Department of Human Services
(Waaxda Adeegyada Dadweynaha)
Office of Developmental Disabilities Services
(Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka)

500 Summer Street NE
Salem, OR 97301

Juun 12, 2020-ka



Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed:

Waxa ugu muhiim adeegyada Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) waa badbaadada, caafimaadka iyo faqo-qabka dadka aanu u adeegno iyo kuwa daryeelka siiya iyaga.

Hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee degaanka iyo gobolka waxay u baahan yihiin caawimaadeena si loo aqoonsado dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) ee tijaabadii laga qaaday lagu ogaaday in ay qabaan cudurka COVID-19 ama dhakhtar u maleeyay in ay qabaan COVID-19. Tani waa qayb ka mid ah dadaalka caafimaadka dadweynaha iyo badbaadada, waxaan u baahanahay in aanu ilaalino bulshadeeda iyada oo la aqoonsanayo halka ay dadka reer Oregon ee leh I/DD ay ka qaadanayaan cudurkani. Haddii aysan jirin taageeradeenu, waxda caafimaadka dadweynuhu ma oga haddii qof la ogaaday in uu qabo I/DD. Waxaanu ka shaqeynaynaa sidii aan wakhti hore aanu wax ugu lug yeelan lahayn iyo in aanu bixino tallaabo taageero leh si dadka looga dhigo kuwo badbaado qaba.

Waxaa dhici karta in aad dareento hubaal la'aan ku saabsan la wadaagista macluumaadka si loo taageero dadaalkani. ODDS way fahamsan tahay muhiimada ay leedahay ilaalinta Macluumaadka Caafimaad ee Shakhsi (PHI) ee loogu talagalay dadka loo adeego iyo kuwa daryeelka siiya iyaga. Inta lagu jiro nidaamka ogaysiinta ee hoosta lagu tilmaamay, ODDS waxay qaadi doontaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo ilaaliyo macluumaadka Shaqaalaha Daryeelka Shakhsiyeed (PSW), inta laga ogeysiinayo dadka helaya adeegyada ee soo gaarista cudurka saameynta ku yeelan kara caafimaadkooda.

Kuwani waa tallaabooyin lagaaga baahan yahay si bulshooyinkeena looga dhigo kuwa caafimaad iyo badbaado qaba:

Haddii aad leedahay kiis la xaqiijiyay oo ah cudurka COVID-19 ama dhakhtar caafimaad kuu sheegay in ay u badan tahay in aad qabto cudurka COVID-19 iyo in aad sii joogto guriga oo gasho karantiin:

Waa in aad la socodsiiisaa Hay'adda Maamulida Kiiska, ama maamulaha kiiska ee qofka aad taageerto. Waa in aad sidoo kale la socodsiiisaa ODDS adiga oo email u diraya: ODDS.Fieldliaison@dhsosha.state.or.u oo bixinaya xogta ah in tijaabadii laga qaaday lagu ogaaday in aad qabto ama dhakhtar caafimaad kuu sheegay in ay u badan tahay in aad qabto cudurka COVID-19 iyo magacyada dadkii aad la soo shaqeysay 14 maalmood ee la soo dhaafay.

“Badbaado, caafimaad iyo xoriyad dhamaan reer Oregon”

Waa Fursad bixiye ay Dadku u Siman yihiin

DHS 2441 (6/20) Somali PSW COVID-19

Haddii aad leedahay kiis la xaqiijiyay oo ah cudurka COVID-19 ama la sheegay in ay u badan tahay in aad qabto cudurka COVID oo aadan la noolayn qof la taageerayo:

- Waxaa dhici karta in aadan ku soo noqon shaqada ilaa:
 - dhakhtar ammar ku bixiyay iyo/ama
 - muddo ah ugu yaraan 14 maalmood ka dib marka la ogaaday in aad qabto cudurka COVID-19 iyo/ama
 - ugu yaraan 72 saacadood aadan yeelan wax astaamo ah.
- Haddii aadan awoodin in aad shaqeyso iyada oo sababtu tahay cudurka COVID-19, macluumaad ku saabsan maqnaanshaha dhibaato jirta awgeed oo loogu talagalay Shaqaalaha taageerada shakhsiyeed ayaa laga helayaa: <https://www.orhomecaretrust.org/hardship-pto/>
- **Ku guuldareysiga joojinta shaqo iyo sii wadista in khatar la geliyo caafimaadka iyo badbaadada qofka(dadka) aad taageerto waxay keeni doontaa joojinta lambarkaaga daryeel bixinta**

Haddii aad la nooshahay qof la taageerayo:

- Tixgeli in aad hirgeliso qorshe loogu talagalay karantiinka guriga dhexdiisa.
- Wax la qorsheyso shaqo-bixiyaha iyo hay'adda maamulida kiiska kaasi oo ku saabsan qorshe beddel ah oo loogu talagalay taageerada joogtada ah haddii aadan awoodin in aad shaqeyso ama qorsheynayo in aad karantiin gasho.

Haddii aad qof taageerto tijaabadii laga qaaday lagu ogaaday in uu qabo cudurka COVID-19 ama qofka dhakhtar caafimaad u sheegay in ay u badan tahay in uu qabo cudurka COVID-19:

Waa in aad la socodsiiisaa Hay'adda Maamulida Kiiska, maamulaha kiiska ee qofka la taageeray, iyo cidda aad u shaqeyso. Waa in aad sidoo kale la socodsiiisaa ODDS adiga oo email u diraya: ODDS.Fieldliaison@dhsosha.state.or.u oo bixinaya magaca buuxa ee qofka, taariikhdiisa dhalasho, taariikhda tijaabada laga qaaday ama dhakhtar caafimaad u sheegay in ay u badan tahay in uu qabo cudurka COVID-19.

Sidoo kale raac tilmaamahani:

- Raac shuruudaha dhakhtarka ee loogu talagalay qofka la taageerayo iyo dhammaan PSW ay is taabteen/isku soo dhawaadeen qofka, oo uu ka mid yihiin karantiinka.
- Raac tilmaamaha dhakhtarka ee ilaalinta balamaha caafimaad.
- Ka taageer qofka in uu yareeyo/xaddido dadka soo booqanaya oo aan ka ahayn kuwa muhiimka ah si loo xaqiijiyo daryeelka sida ay ammarka ku bixisay waaxda caafimaadka dadweynaha ee degaanku.
- Isticmaal Qalabka Shakhsi ahaan La isku ilaaliyo (PPE) inta aad taageerayso qofka
 - Haddii aad u baahan tahay PPE (*gacmo gashiga ama maaskaro*), la xiriir maamulaha kiiska ee qofka aad taageerto. PSW ayaa sidoo kale codsiga loogu talagalay u gudbin kara Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon iyaga oo foom elektaroonig ah ka buuxinaya website-ka <https://seiu503.tfaforms.net/622> ama email u diraya OHCC.CustomerRelations@dhsosha.state.or.us. Haddii aadan awoodin in aad hesho PPE, ku qor tani xaashidaada shaqada.

- Ku dhiirigeli qofka in uu xirto wax wajiga lagu daboolo ama maaskaraha qalliinka
- Ka taageer qofka soo ururinta agabka loo baahan yahay ee loogu talagalay mudada karantiinka lagu jiro
- Ka taageer qofka u wareegista meel kale oo beddel ah haddii ay jirto
- Ka taageer qofka in uu hayo diiwaanka dhammaan dadka ay is taabtaan/isku soo dhawaadaan, (oo ay ku jiraan PSW, Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah, iwm.)
- Ka taageer qofka in uu sida ugu habboon u isticmaalo isgaarsiinta dhanka elektarooniga ah ee loogu talagalay qoyska iyo asxaabta.

Had iyo jeer raac tilmaamaha Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyo [tilmaamaha la raacayo ee OHA ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga dhexdiisa.](#)

Waad ku mahadsan tahay caawimaadaada in aad xaqiijiso caafimaadka iyo badbaadada inta lagu jiro waqtigani.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty

Agaasimaha

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Macluumaadka ku saabsan cudurka COVID-19, oo ay ku jiraan siyaasadaha iyo ilaha ODDS, ayaa laga helayaa internet-ka iyo iyaga oo ku qoran luqaddo badan:

<https://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/ODDS-COVID-19-Information.aspx>